

# WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA

## ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

### Imtixaanka Tijaabada Aqoonta Heerka D

(Kani waa imtixaan tijaabo ah. Su'aalahan waxaa laga yaabaa inay iimtixaanka dhabta ah ku jiraan ama ayna ku jirin. Dhammaan jawaabaha su'aalaha imtixaanka tijaabada ah iyo imtixaanka dhabta ahba waxaa laga heli karaa Buuga Darawalka Minnesota). Jawaabaha su'aalaha imtixaanka tijaabada ah ee hoose waxay ku yaallaann cutubyada u dhigma ee Buuga Darawalka Minnesota.

1. Waxaad dhaafi kartaa baabuur kale haddii khadka kala qaybinaya haadkaaga iyo haadka aad rabto inaad gasho uu yahay \_\_\_\_\_. (Akhriso: Cutubka 5, Calaamadaha, Astaamaha, iyo Calaamadaha Laamiga—Calamadaha Laamiga.)
  - a) Caddaan kala go'go'an
  - b) Jaallaha labanlaaban ee xiriirsan
  - c) Jaallaha xiriirsan
  - d) Caddaanka xiriirsan
2. Markaad leexanayso, waa inaad xawaarahaaga \_\_\_\_\_. (Akhriso: Cutubka 3 Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurta — Leexashada.)
  - a) Kordhiso
  - b) Inta aad ku socoto uu ahaado
  - c) Wuu kala duwanyahay
  - d) Yarayso
3. Si aad ugu diyaargarowdo wax kasta oo ku soo socda jidka kaa horreeya, waa in aad: (Akhri: Cutubka 6 Shuruudaha Wadista—Isticmaalka Nidaamka SIPDE.)
  - a) Si joogto ah u indha indhayso jidka oo dhan iyo dhammaan dhinacyada waddada
  - b) Si toos ah horay u eegto mar kasta
  - c) Aad gaariga waddid adigoo cagtaada bidix si fudud u saaraya biriiga
  - d) In aad diirada saarto bartamaha waddada
4. Waxaad gaariga ku waddaa waddo mashquul ah, shareeraha/xawaareeyaha gaarigaaga ayaa ku dhegay inuu furmo. Waa in aad: (Akhriso: Cutubka 6 Shuruudaha Wadista—Beedalka Gaaska ee Ku dhegay.)
  - a) Hoonka garaac
  - b) Xoog u qabo biriigaaga
  - c) Waa inaad daarato nalalkaaga biliglaha ee 4ta dhinac ku yaalla
  - d) Demi matoorka, adigoo ka taxadaraya inaad howlgelinin habka qululka isteerinka
5. Markaad ku soo dhawaato isgoyska yaraynta isku dhaca, ma aha in aad u leexato bidix. (Akhri: Cutubka 3 Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurta-Isgoysyada Yaraynta Isku Dhaca.)
  - a) Run
  - b) Been
6. Habeenkii, way ugu adag tahay in la arko: (Akhri: Cutubka 4aad Wadaagga Waddada—Fiirso.)
  - a) Calaamadaha waddada
  - b) Dadka lugeynaya
  - c) Gaadiida kale
  - d) Nalalka waddada



# WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA

## ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

7. Haddii aad waddada istaagto habeenkii: (Akhri: Cutubka 3 Sharciyada Waddada iyo Wadista Baabuurta—Baabuur Dhigashada Waddada Weyn.)
- Dami dhammaan nalalkaaga
  - Isticmaal nalalkaaga baarkinka oo kaliya
  - Isticmaal nalalkaaga hore oo kaliya
  - Waa in aad daarato nalalkaaga biliglaha xaaladaha degdega ah oo aad daarato nalalkaaga iftiinka hoose
8. Dadka lugaynaya ee isticmaalaya eyga hagaha ah ama bakooraad cad waa in: (Akhri: Cutubka 4, Wadaagista Waddada—Ogaanshaha Dadka Lugeynaya.)
- Waa in la siiyo jidka marka ay joogaan geesaha oo kaliya
  - Waa in la siiyo jidka markasta
  - Waa in ay ka gudbaan oo keliya isgoosyada leh kontaroolada taraafiga
  - Waa in ayna marna waddada ka ka gudbin iyadoo ayna caawinaynin dad kale oo lugeynayaa
9. Kahor intaadan ka tagin meel baabuurta la dhigto oo isku barbar safan, waa inaad: (Akhri: Cutubka 3, Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurka—Beddelashada Haadka.)
- Waa inaad hoonkaaga yeeriso
  - Waa inaad daarato nalalkaaga biliglaha ee 4ta dhinac ku yaalla
  - Waa inaad iska fiiris gaadiidka adigoo madaxa jeedinaya
  - Waa inaad gaadiidka iska fiiriso adiga oo isticmaalaya muraayadaada gadaal lagu fiiriyo ee gudaha baabuurka ku taalla
10. Waddada leh saddex haad ama in ka badan oo isku dhinac u socda, ku jir haadka \_\_ , marka laga reebo marka aad baabuur dhaafayso. (Akhri: Cutubka 3—Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurta.)
- Dhanka bidix
  - Garabka
  - Dhexda
  - Dhanka midig
11. Markaad ku dhex waddo baabuurka ceeryaamo ama roob, waxaa habboon in aad: (Akhri: Cutubka 6, Xaaladaha Baabuur Wadista — Baabuur ku Wadista Roob Culus ama Ceeryaamo.)
- Waa inaad daarato nalalkaaga baarkinka oo kaliya
  - Waa inaad daarato nalalkaaga biliglaha halista ee 4ta dhinac ku yaalla
  - Waa inaad daarato nalalkaaga midka iftiinka hoose
12. U diyaargarowga sigaar cabbista iyo sigaar cabista marka aad baabuur wadayso: (Akhri: Cutubka 6; Xaaladaha Baabuur Wadista — Baabuur Wadista Mashquulsan.)
- Ma saamayso kartida baabuur wadista
  - Waxay ka caawisaa ilaalinta feejignaanta darawalka
  - Waa hawlo mashquulin ah
  - Ma aha hawlo mashquulin ah
13. Muxuu khamriga ku sameeyaa xirfadahaaga wadista iyo garaadka? (Akhri: Cutubka 8, Baabuur Wadista iyadoo ay kugu jirto Saamaynta Khamriga ama Daroogadu - Saamaynta Khamriga Ku Leedahay Xirfadaha Baabuur Wadista.)
- Wax saamayn ah kuma laha xirfadaha wadista ama garaadka
  - Wax saamayn ah kuma laha garaadka laakiin waxay dhaawacdaa xirfadaha wadista
  - Waxay caawisaa xirfadaha wadista laakiin waxay dhaawacdaa garaadkaaga
  - Waxay dhaawacdaa xirfadahaaga wadista iyo garaadka labadaba



# WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA

## ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

14. Falaadh guduudan oo midigta u jeedda nalka taraafiga macnaheedu waa? (Akhri: Cutubka 5, Calaamadaha, Astaamaha, iyo Calaamadaha Laamiga— Falaarta Cas.)
- Midig u leexo kadib markaad si buuxda u istaagto
  - Midig ha u leexan ilaa nalku cagaar noqdo
  - Midig u leexo kadib markaad soo qaboojiso oo iska fiiriso gaadiidka
  - Midig u leexo kaliya haddii aysan jirin dad lugeynaya oo ka gudbaya waddada xilligaas
15. Marka aad joogsi ka soo gasho waddada (tusaale marka aad ka soo dhaqaaqdo waddada dhinaceeda), waa in aad: (Akhri: Cutubka 3, Sharciyada Gaadiidka iyo Wadista Baabuurta—Beddelashada Haadka; Cutubka 6, Xaaladaha Wadista -Isticmaalka nidaamka SIPDE.)
- Waa in aad ku socoto xawaare gaadiidka kale ka hooseeya 200 oo fiid
  - Waxay u baahan tahay firaqo weyn oo kugu filan si aad u gaarto xawaaraha gaadiidka socda
  - Waa in aad sugto inta uu gaadhiga ugu horreeya ku dhaafayo, ka dibna gal haadka
16. Waa inaad had iyo jeer isticmaashid nalalkaaga biliglaha xaaladaha degdega ah marka: (Akhri: Cutubka 6, Xaaladaha Wadista—Joojinta, Baarkinka, Gadaal u bixitaanka, Waxa la Sameeyo Haddi aad Go'doonto.)
- Marka aad laba baarkin ku taagantahay haadka baabuurto marto
  - Marka aad gaariga dhigatay meel baarkin calaamadaysan
  - Marka uu baabuurkaagu ku jabay waddada
17. Nalka taraafigu waa casaan, laakiin sarkaal booliis ah ayaa kuu sheegaya inaad sii socoto. Maxay tahay in aad samayso? (Akhri: Cutubka 5, Calaamadaha, Astaamaha, iyo Calaamadaha Laamiga— Saraakiisha Taraafikada.)
- Inaad diido inaad dhaqaajiso gaarigaaga
  - Inaad socoto sida uu sarkaalka booliisku kuu sheegay
  - Inaad hoonkaaga yeeriso
18. Haddii aad tahay qof aan qaangaarin oo uu telefankaaga gacantu soo dhaco adiga oo baabuur wada, waa inaad: (Akhri: Cutubka 1, Ruqsaddaada Wadista Kayar 18; Ruqsaddaada Wadista, Shatiga Ku meel gaarka ah; Cutubka 8, Xaaladaha Wadista — Baabuur Wadistaa Mashquulsan. )
- Ka jawaab haddii aad haysato qalab aan gacmaha lagu qabsanaynin
  - Ha ku dhafo wicitaanku oo ha u gudbo fariin laguu reebo
  - Ka jawaab haddii wicitaanku ka yimid waalidkaa ama masuulkaaga
  - Fariin qoraal ah ugu dir qofka ku soo wacaya in aad gaari wadayso
19. Habeenkii, haddii baabuur kugu soo socdaa uu ku guuldareysto inuu daciifiyo nalka awooda sare, fiiri: (Akhri: Cutubka 8, Xaaladaha Baabuur Wadista—Nalalka Indhaha Baabuurta.)
- Fiiri dhanka bartamaha waddada
  - Fiiri dhanka cidhifka midig ee haadkaaga
  - Fiiri dhanka cidhifka bidix ee haadkaaga
  - Fiiri tooska hortaada ee haadkaaga
20. Darawalada da'yarta ah waxay aad ugu dhowdahay inay shil galaan marka: (Akhri: Cutubka 1, Ruqsaddaada Wadista — Shatiga ku Meel Gaarka ah.)
- Marka uu la socdo rakaab qof gaangaadh ahi
  - Marka uu la socdo rakaab qof dhalinyaro ahi
  - Marka uuna la socon wax rakaab ahi



# WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA

## ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

21. Isticmaal nalkaaga hore wakhtiga roobka, barafka, ama ceeryaamada: (Akhri: Cutubka 2, Baabuurkaaga—Nalalka Hore iyo Nalalka Dambe; Cutubka 8, Xaaladaha Wadista—Nalalka Hore, Ku Wadista Roob Culus ama Ceeryaamo.)
- Daaro nalka iftiinka buuxa
  - Si ay darawalada kale ku arki karaan
  - Si aad ugu digto dadka kale xaaladaha xun
22. Markaad rabto inaad u leexato midig, baabuurkaagu waa inuu joogo: (Cutubka 3, Sharciyada Wadooyinka iyo Wadista Baabuurta— leexinta.)
- Meel u dhow bartamaha waddada
  - Meel u dhow dhanka bidix ee waddada
  - Meel u dhow dhanka midig ee waddada
23. Marka nalka taraafigu cagaar noqdo, ma in aad isla markiiba dhaqaaqdaa? (Akhri: Cutubka 5, Calaamadaha, Astaamaha, iyo Calaamadaha Laamiga— Nalka Cagaarka ah.)
- Maya, sababtoo ah waa inaad sugtaa shan ilbiriqsi ka hor intaadan dhaqaaqin
  - Haa, ama waxaa lagu siin karaa tigidh sababtoo ah waxaad abuuraysaa ciriiri
  - Haa, laakiin waa inaad jidka siiso baabuurta ama dadka weli ku sugan isgoyska
24. Haddi aad ku aragto calamadaha dhismaha liimiga/oranjiga ah iyo qalabka caagaga calaamadaha, waa in aad: (Akhri: Cutubka 5aad, Calaamadaha, Astaamaha, iyo Calaamadaha Laamiga —Calamadaha.)
- Beddello haadka oo sii wado xawaarahaaga hadda
  - U diyaargarow shaqaalaha iyo qalab kaa horreeya
  - Hoos u dhig xawaarahaaga sababtoo ah haadku wuu dhammaanayaa
25. Kadib marka ay ku joojiyaan sharci fulintu, darawalku waa inuu isla markiiba ka baxo baabuurka oo uu si dhakhso ah u aado baabuurka booliiska. (Akhri: Cutubka 4, Wadaagista Waddada—Waxa la Sameeyo oo la Fisho marka ay ku Joojiyaan Sharci fulintu.)
- Run
  - Been



## Furaha Jawaabaha

1. **a**
2. **d**
3. **a**
4. **c**
5. **a**
6. **b**
7. **d**
8. **a**
9. **c**
10. **d**
11. **c**
12. **c**
13. **d**
14. **b**
15. **b**
16. **c**
17. **b**
18. **b**
19. **b**
20. **b**
21. **b**
22. **c**
23. **c**
24. **b**
25. **b**



**WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA**  
**ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA**



**DVS**  
Driver &  
Vehicle Services